Guduniinka gabdhaha iyo haweenka, kaasoo loola jeedo jarjarista xubinka taranka

thl.fi/silpominen



# Guduniinka gabdhaha iyo haweenka, kaasoo loola jeedo jarjarista xubinka taranka

**Gudniinka gabdhaha iyo haweenka (jarjaridda) waxaa loola jeedaa in la jaro qaybta kore ee bannaanka u soo baxsan ee xubinka taranka ama in la waxyeelleeyo iyadoo aanay jirin wax sabab caafimaad ah.**

Gudniinka gabdhaha waa arrin la xiriira dhaqan, kaasoo asalkiisu yahay rabitaan ah in ilmaha la ilaaliyo. Sidoo kale arrimo la xiriira dhanka bulshada iyo mooraalka ayaa saamayn ku leh sii socoshada caadadaan. Iyadoo gudniinkaas la kaashanaayo, ayaa la awoodaa in gabadha lagu xiro dhaqankeeda u gaarka ah iyo qoyskeeda. Gudniinka gabdhaha waa mid dhaawacaaya xuquuqo bani'aadam oo dhowr ah, dalkaan Finland waxaa uu ka yahay dambi. Sidoo kale gudniinka lagu soo sameeyay dalka dibaddiisa waa dambi, haddii qofka dhibbnaha ah uu yahay qof si joogto ama abadiyan ah u deggan Finland. Gudniinka gabdhaha iyo haweenka waa mid qaabab kala duwan loo sameeyo. Waxaa loo samayn karay qaab ah muditaan yar ama sarmo ama goyn xubinka taranka ah, qaabka ugu xagjirsan ee jarjarista ah waa mid ay dhici karto in qaybta kore ee bannaanka

ah ee xubinka taranka gabi ahaanba la gooyo. Gudniinku wax faa'iido ah uma lahan caafimaadka. Caadi ahaan wuxuu sababaa dhibaatoyin caafimaad, sida dhiigbax, caabuq ama infekshan, xanuun iyo dhibaatooyin xagga caafimaadka maskaxda ah.

## Waxaad heleysaa caawimaad ku saabsan dhibaatooyinka uu keeno gudniinka.

### Qalliinka furitaanka

- Faruuryaha xubinka taranka ee gudniinka awgiis la isku tolay, waa la furi karaa. Furitaankaas wuxuu fududaynayaa dhibaatooyinka la xiriira dhiigga caadada, kaadida, galmada iyo dhalliinka.
- Caadi ahaan marka la samaynaayo qalliinka furitaanka, qofka waa la kabuubyaynaayaa. Waxaa sidoo kale qalliinkaas la samayn karaa xilliga haweeneydu ay uurka leedahay.

### Qalliinka dib u habaynta (korjausleikkaus)

- Qalliinka dib u habaynta ujeeddadiisu waa in dib loo soo celiyo qaab-dhismeedka iyo shaqada caadiga ah ee xubinta taranka ee haweenka.
- Qalliinka dib-u-habeynta wuxuu ka ballaaran yahay qalliinka furitaanka gudniinka waxaana lagu sameeyaa badanaaba suuxdin.
- Qalliinka dib u habaynta waxaa Finland laga heli karaa xarumaha daryeelka caafimaadka dadweynaha. Qalliimmada dib u habaynta waxaa lagu sameeyaa qaybta qalliinka dib u habaynta ee isbitaalka jaamacadda HUS.

**Caadadaas waa mid keeneysa dhibaatooyin caafimaad, waana dambi. Waa inaan si wadajir u dabargoynnaa caadadaas!**

## CAAWIMAAD AYAA LA HELI KARAA

Haddii aad dareento halista ah in gudniin lagugu samaynaayo, waxaad la soo xiriirtaa lambarka 112 ee booliska, ama u sheeg arrinkaas xirfadlayaasha arrimaha bulshada ama kuwa daryeelka caafimaadka, macallinka ama dadka kale ee xirfadlayaasha ah.

**Nollalinja:**
nollalinja.fi/so ama wac 080 005 005

**Guryaha ammaanka:**
nollalinja.fi/turvakoti

**African Care:** africancare.fi

**The Finnish League for Human Rights:**
ihmisoikeusliitto.fi

## Faahfaahinta dheeraadkaah

thl.fi/silpominen

THL:n väkivallan vastainen työ,
thl.fi/vakivalta